

**Maansadan Hadoodilan****Maxaa hoosta ugu jira??????????????**

Faras loo hanweyn yahay  
Hankabsigiyo booddada  
Geenyadii habbonayd  
Baqashaan hallawga ah  
Maxaa loogu hilayaa????

Markii nadi haleelana  
Haadda kula tartamayyo  
Iyadoo la heli karo  
Heensihiyo kooraha

Hayin labiyotoban jirey  
Wixii lagu hidiidiyo  
Hinjiyoo la kici kara  
Shacabyohow habasani  
Ee Markii la hoosimo  
Idiin saaray heeryada??????????

Haybadda iyo xooggana  
Haamaha culayska leh  
Iyadoo la heli karo  
Maxaa awrka harabka ah  
Aan hirig awood Karin

Harweynaha Canjeeloo  
Kun nun hoos ku deeqoo  
Iyadoo la heli karo  
Nagaar hooska loo biday??????????

Hogob godan ku yaaloo  
Hareertiisa ceel yahay  
Maxaa habarticaac iyo

Habaqliyo socdaal iyo  
Deeqsiguu ku hiran jirey  
Hor Ilaah u bixin jirey  
Bakhayl hooyadiis iyo  
Waynagaa ku hoyanaye  
Dadkii waa hurdoodaye  
Hilbaba yuusan keenine  
Haruur lagama filayoo  
Ma inaan is hiifnaa???????

Dadka hilinka marayaa  
Oo haynta xoolaha  
Iyadoo la heli karo  
Martida aan hargelin Karin  
Waa habeen barkiiyoo  
Hebelna waa naqaanoo  
Halab caaneheed iyo  
Huraa looga quustaye

Hasha kaynta lagu qalay  
Hulkujir iyo miilkii  
Oo horteenna wadayaal  
Hunguriga la xooree  
Dhasho hilib ma noqotee

Hilba qaybsigeedii  
Iyo hilib magoolkii  
Iyadoo la heli karo  
Loo tuuray haadkiyo  
Maxaa inaku soo hilay???????

Horweynteenna kii dhacay  
Naga qalay haleelada  
Iyadoo la heli karo  
Loogu hanjabaayaa??????

Hororkii diraacdii  
Habaar waalid qabahaas  
Maxaa habarta weyddaa ah

Halaqiyo Abeesada  
Hebel iyo heblaba cunay  
Maxaa hadimo weeyee

Inta hoyga soo galay  
Iyadoo la heli karo  
Hangaraarac loo diley????

Hal abuurayaashii  
Haaneedi jirayow  
Maansadan hadoodilan

Suugaanta hodanka ah  
Hal xiraale weeyee  
Maxaa hoosta ugu jira??????